



KORMEERAHA ARRIMAHAA CARRUURTA



Waan ku salaamay

Magacaygu waa Inga, waxan ahay kormeeraha arrimaha carruurta ee Norway (barneombud). Anigu waxan ilaaliyaa in carruurta oo dhan ay ku noolaato xaalad wacan. Waxyaalaha aan aad u daneeyo waxa ka mid ah in loo baahanyahay in carruurta oo dhan hesho guri wacan oo nabad ah. Haddii carruurtu heli weydo waxa loo baahanyahay in dadka waaweyn u helaan meel kale oo ay joogaan.

Waxa aad hadda timi xarunta dadka dhiban (kriesenter). Halkani waa meel amaan ah. Waxa suurtagal ah in aad dareentay cabsi, amaan la'aan iyo murugo. Ma la rabo in waxyaalahaasi ku dhacaan carruurta. Carruurta oo dhan waxa ay xaq u leeyihii nolol aan lahayn tacadi. Taas oo macnaheedu yahay in aan la ogolayn in cid kuu hanjabto, ku disho ama jidhkaaga ku samayso wax aanad rabin. Waa madnuuc in qof weyni kuu hanjabo, ku dilo ama ku dhaawaco. Dadka waaweyn waxay masuul ka yihiin inay ka shaqeeyaan wanaagaaga.

Isla markaana dadka waaweyn ma loo ogola inay dhaawacaan dadka kale ee waaweyn. Laga yaabaa inaad aragtay ama maqashay in qof weyn la dilayo, laga yaabaa in qofkaasi ahaa hooyadaa ama aabahaa? Ma la rabo in aad aragtid qof ka tirsan qoyskaaga oo dhibaataysan.

Marka qofka loo geysto tacadi, ama uu arko dad kale oo tacadi lagu samaynayo waxa caadi ah in uu dareemo waxyaalo kala duwan. Dadka qaar waxa ku dhaca murugo, dad kalena waxa ku dhaca jiho-wareer, xanaaq iyo cabsi. Dadka qaar si wacan ma u fahmaan waxa ay ka fekerayaan ama dareemayaan. Dareennada oo dhan waa wax caadi ah. Laakiin waxa muhiim ah inaad qof weyn u sheegtid sida ay xaaladaadu tahay.

Xaruntan dadka dhiban waxa ka shaqeeya dad waaweyn oo bartay sida loola hadlo carruurta dhibaataysan. Waxa aad u sheegi kartaa sida ay tahay xaaladaadu, iyaguna way ku caawin karaan. Mida kale qoraal ayaad u soo diri kartaa Kormeeraha Arrimaha Carruurta haddii aad qabtid su'aalo.

Waxan kuu rajaynayaa khayr iyo in adiga iyo qoyskaagu roonaataan.

Waxa ku soo salaamaya
Kormeere Inga Bejer Engh